IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 7aad | Muqdisho, 1 Maarso 1979 L. 3

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — بريدة سهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba** — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya **gudeheeda — dibaddedana waa** Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu **ka bilabmaa** 1 **Janaye**. Qiimaha qortitaanku F.R. nalkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba **Sh.** — **Rukunka iyo qortitaanku** waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — **Lacagta waxaa lagu** bixinayaa Xanska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## QAYBTA KOOWAAD

### SHAHRCI

SHARCI L. 5 ee 19 Feb. 19, Mashruuca Harumarin- Bogata Beeraha :- 180

SHARCI L. 6 ee 19 Feb. 79, Dhismaha Machadka Teknolojiyada Soomaaliyeed :- » 187

SHARCI L. 7 ee 19 Feb. 79, Billadaha Maamuuska Milleteriga :- » 194

## QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 17 ee 1 Feb. 79, Qaadid Guryo Dan Guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Shariif Saalax Xasan Cumar oo ay la wareegtay Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed kuna yaal Muqdisho Degmada Shingaani :- » 200

XEER WASAARADDA B. IYO IS. L. 18 ee 5 Feb. 79, Xeer Nidaamiye Farsama yaqaannada Isgaarsiinta loo carbinaayo dhammaan Waaxyaha » 202

# QAYBTA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, 29.1.79, Lumid Jeeg W. L. 116453 ku qoran Shs. 41.000 uu leeyahay L/Xiddigle Maxamed Cilmi Faarax L. 151 » 227

Shineemo «Hodon S.P.A. 28.2.79, Ogeeysiis Isuimaatin Caadi ah » 228

SOMALI BOTTLING COMPANY DIGNIIN ISKU YEERID AH L.152 BIS

## SAXID QALAD

FAAFINTA RASMIGA AH ee Lamb. yahay 1r 10 ee 25 Oktoober 78, Bog. 674 ku qoran Naado Dhul Jaalle Cabdi Xaaji Yuusuf L. 576, waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran;

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 9 Luulyo 78, Naado Dhul Jaalle Cabdi Xaaji Maxamed Yuusuf (Goobdoon)

## QAYBTA KOOWAAD

SHARCI L. 5 ee 19 Feb. 1979 Mashruuca horumarinta Beeraha

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan. 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Heshiiska Lamb 635/50 Taariikhdiisuna 7.7.76 ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Bangiga Adduunka (IDA)
Adduunka (IDA) kuna saabsan amaah lacageed oo loogu tala galay horumarinta Beeraha G. W. Galbeed.

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la dhiso hay'ada madaxbannaan oo ka mas'uul ah fulinta howlaha la xiriira heshiiska xusan.

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X. H. K. S. iyo kan Golaha Wasiiradda.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda

qod 1aad

DHISMAHA MASHRUUCA

1) Mahhruuca horumarinta Beeraha ee Gobolka waqooyi Galbeed oo iminka wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono «Mashruuca» ayaa halkan lagu dhisay.

2) Mashruuca wuxuu yahay mid madax banaan oo awood iyo jirid qaanuuni ah leh, wuxuu la mid yahay Wakaaladaha ama Mashaariicdda heerkoodu yahay (A).

Qodobka 2aad

Ujeeddooyinka Mashruuca

Ujeeddooyinka Mashruuca waxay yihiin:

1) Horumarinta Guud ee tacabka beeraha G. W. Galbeed

2) Ka horteggidda iyo ciribtirka dhibaatooyinka nabad-dguurka dhulka beeraha.

3) Horumarinta waraabinta beeraha Gobolka W/Galbeed iyo hawlaha la xiriira.

4) Fidinta aqoonta beeraha iyo tababarka beeraleyda Gobolka

5) Tababaridda iyo kor u qaadidda aqoonta iyo waayo-aragnimada shaqaalaha beeraha ee Gobolka.

Qodobka 3aad

Xarunta Mashruuca

Xarunta Mashruuca waxay ahaan doontaa Hargeysa oo ah Magaala Madaxda Gobolka Waqooyi Galbeed.

Qodobka 4aad

Awoodda

Mashruuca wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo ujeeddooyinka ku xusan qodobka 2aad ee Sharcigan.

Qodobka 5aad

Xubnaha Mashruuca

Xubnaha Mashruuca waxay ka kooban yihiin:-

1) Guddiga Sare

2) Maareyn Guud

3) Guddiga Fulinta

4) Waaxyo iyo xubno kala duwan oo lagu fuliyo ujeeddooyinka sharcigan ku tilmaaman.

Mashruuca wuxuu kaloo yeelanayaa xubin madax-bannaan oo lagu magacaabi doono xubnita Qorsheynta iyo Daraasaadka oo qaban doonta howlaha la xiriira Qorshaha iyo daraasaadka.

Qodobka 6aad

Guddiga Sare

1) Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:-

| | | |
|---|---|---|
| a) | Wahiirka Beeraha | (Guddoomiye) |
| b) | Wasiirka Maaliyadda | (Xubin) |
| c) | Guddoomiyaha Bankiga Horumarinta | (Xubin) |
| d) | Maareeyaha Guud ee Mashruuca | (Xoghaya) |

2) Hawlaha Guddiga Sare ee Mashruuca:-

a) Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu ka mas'uul yahay dejinta Siyaasadda Guud eeMashruuca lagu maamulo. Wuxuu had iyo jeer go'aanno ka gaari doonaa sifaalaha lagu maamulaayo hawlaha la xiriira Mashruuca isagoo tixgelinaya ujeeddooyinka guud ee Mashruuca iyo talada Maareeyaha Guud.

Wuxuu talo ka bixinayaa Magacaabidda Madaxda Mashruuca.

b) Guddiga wuxuu leeyahay awood kormeer joogta ah ama mid kedis ah oo u ku sameyn karo Mashruuca.

## Qodobka 7aad

## Guddiga Fulinta

1) Guddiga Fulinta wuxuu ka kooban yahay

a) Maareeyaha Guud ee Mashruuca (Guddoomiye)

b) Agaahimaha Waaxda dhaqaaleynta Ciidda iyo Biyaha (Xubin)

c) Agaasimaha Waaxda Fidinta iyo Horumarinta beeraha Roobka »

d) Agaasimaha waaxda Maamulka »

e) Agaasimaha waaxda khudrada »

f) Khabiirka Farsamada Qalabka »

2) Xubnaha Guddiga Fulinta ee kor ku xusan marka laga reebo Maareeyaha Guud yaxay ka koobnaan doonaan koox khubaro ah oo ka caawinidoona Maareeyaha Guud Fulinta Howlaha Mashruuca.

Khubarada waxay ku wareejindoonaan Xilka Aqoonyahanada iyo Farsamayaqaanada Soomaalida ee Mashruuca hadba sida looga maarmo.

3) Hawlaha Guddiga Fulinta
Guddiga Fulinta wuxuu si wadajir ah mas'uul uga yahay fulinta ujeeddooyinka guud mashruuca ee ku xusanqodobka 2aad ee Sharcigan iyadoo islamarkaasna xubin kasta ay si toos ah mas'uul uga tahay hawlaha u gaarka ah.

4) Guddigu wuxuu talo iyo warbixinba ka bixinayaa sida ay u socdaan hawlaha Mashruuca iyo miisaaniyadda isagoo u gudbinayaa Guddiga Sare ee Mashruuca.

## Qodobka 8aad

## Fadhiyadda Guddiga Sare ee Mashruuca

Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu yeelan doonaa ugu yaraan (2) laba fadhi sanad kasta ama hadba sida loogu baadho. Fadhiyadda Guddiga Sare ee Mashruuca waxa isugu yeeraya Xoghayahana ka ah Maareeyaha Guud ee Mashruuca.

Waxa kaloo fadhiyadaasi isugu-yeeri kara Wasiirka Beeraha ama xubin kasta oo ka mid ah Guddiga Sare ee Mashruuca.

### Qodobka 9aad

### Fadhiyadda Guddiga Fulinta

Guddiga Fulinta wuxuu yeelandoonaa ugu yaraan 1 (hal) fadhi bishii ama hadba sida loogu baahdo. Fadhiyadda Guddiga Fulinta waxaa isugu yeeraya Maareeyaha Guud ee Mashruuca.

### Qodobka 10aad

### Hawlaha Maareeyaha Guud

Maareeyaha Guud ee Mashruuca wuxuu ahaan doonaa Guddoomiyaha Guddiga Fulinta (PIU), wuxuuna ka mas'uul yahay Maamulka Guud iyo fulinta ujeeddooyinka Mashruuca, qoridda, asluubta iyo daryeelka shaqaalaha, maamulka lacagta, la talinta Guddiga sare ee Mashruuca iyo saxiixa heshiisyada Mashruuca dhan ka yahay isagoo la socodsiinyaaa Guddiga Sare ee Mashruuca iyo kuwa Guddiga fulinta

### Qodobka 11aad

### Magacaabidda Xubnaha Mashruuca

Maareeyaha Guud iyo Madaxda kale ee Soomaalida waxa lagu magacaabi karaa xeer uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinayaa ra'yiga Guddiga Sare ee Mashruuca.

### Qodobka 12aad

### Xuquuqda Dhaqaalaha

Xuquuqda Dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud iyo Madaxda kale ee Soomaalida waxaa xukumi doona sharciga lamb. 36. ee 22kii Abriile, 1972 iyo Xeerarka lambar M.G.S.K. Lamb 74 ee 22kii Abriile 1972.

### Qodobka 13aad

### Shaqaalaha

1) «Mashruuca» wuxuu qoran karaa Shaqaalaha uu u baahan yahay iyadoo la raacayo Sharciyadda shaqa qoridda. Islamarkaas Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu qorto khubarada Ajnabiga ah ee uu u baahan yahay isagoo raacayaa sharciydda dalka sitana ogolaashaha Guddiga Sare ee Mashruuca.

2) Shuruudaha Shaqada ee Shaqaalaha Mashruuca waxaa xukumaya sharcigan iyo qawaaniinta faahfaahsan Regulation) ee Sharcigan la xidhiidha, iyo sharciyada ku xusan qodobka 12 ee Sahrcigan.

### Qodobka14 aad

### Raasumaalka Mashruuca

Raasumaalka Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:-

1) Lacagta dakhliga ee ka imaaneysa IDA, Dawladda J.D.S iyo beeraleeyda Gobolka oo guud ahaan isku-dhan 13,930,000 oo Doollarka Mareeykana ah ama So. Sh. 87.062.500

2) Wixii lacag ah oo ka soo gala hawsha Mashruucu qabto

3) Wixii hanti ah ee Dawladda iy Ururrada Caalamiga ahi ugu deeqaan «Mashruuca»

4) Wixii lacag ah ee Mashruuca Dibedda kaga yimaada amase Waddanka Gudihiisa.

5) Wixii lacag kayd ah «Reserve Fund» ee sanad kasta u dhigma «Mashruuca»

6) Wixii hanti ah oo degdeg amase si kale ku soo gala «Mashruuca».

### Qodobk 15aad

### Miisaaniyadda Mashruuca

Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Seteember ama inta ka horeysa sanad kasta waa inuu isku dubaridaa miisaaniyadda sanadka maaliyadda soo gelaya isagoo faahfaahinaya kuna muujinaya bandhigga miisaaniyadda lacagta soo geli doonta iyo tan ka bixi doonta wuxuu hordhigi doonaa si loo ogolaado Guddiga sare ee Mashruuca kadib marka uu la tashado Guddiga Fulinta.

### Qodobka 16aad

### Xisaabdka sanadka

1) Maareeyaha Guud marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horeeysa sanadkasta waa inuu diyaariyo, iskuna soo dubaridda xisaabaadka sanadka iyo bandhigiggii macaashka iyo kharashka Mashruuca ee sanadkii maaliyadda ee horee, is-

lamarkaasna u gudbiya Guddiga Sare ee Mashruuca kaddib marka uu la tashado Guddiga Fulinta.

2) Guddiga Saree ee Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu oggolaado ama wax ka beddelo xisaabaadka sanadka wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharashka uu bixinayo «Mashruuca».

Qodobka 17aad

Amaahda

«Mashruuca» isagoo haysta guddoonka Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu ka amaahdo lacag xarumaha lacagta (Financial Institutions) ee Dalka iyo Dibedda si uu u hirgeliyo xilka la saaray ama ujeeddooyinka «Mashruuca» iyadoo la tixgelinayo raasamaalka Mashruuca oo la filayo in lagu bixiyo amaahdaas.

Qodbka 18aad

Baadhidda Xisaabaadka

Xisaabaadka «Mashruuca» waxaa baahi doona Hantidhowrka Guud.

Qodobka 19aad

Maamulka Lacagta

Maamulka Lacagta ee Mashruuca waxa xukumaya laguna maamulayaa habka ay tilmaamayaan sharciyada Dawladda iyo qawaaniinta faahfaahsan ee la xidhiidha.

Qodobka 20aad

Guddoominta Qawaaniinta Faahfaahsan

Madaxweynaha J. D. S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaya talada «Guddiga Sare ee Mashruuca» inuu soosaaro xeer faahfaahsan oo tilmaamaya habka hirgelinta qodobadda sharcigan.

Qodobka 21aad

Heeshiiska

Heshiiska lam. 635/50 ee 7dii Luulyo, 1976kii ee ka dhexeeya J.D.S. iyo Baanka Adduunka (IDA) waa midka ku lifaaqan

sharcigan wuxuuna ka mid yahay isla sharcigan :-
Heshiiskaas waxaa loo beddeli karaa qodobaddiisa hadba sida labada dhinac oo u khuseeyo isla gartaan.

Qodobka 22aad

Dhaqanka Gelid

1) Sharcigan wuxuu dhaqan galay 1dii Jannaayo, 1978.

2) Sharcigani wuxuu ka mid noqon doonaa sharciyada rasmiga ah iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, Jannaayo 1978

S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA J.D.S.

SHARCI L. 6 ee 19 Feeb. 79 Dhismaha Machadka Teknolojiyada Soomaaliyeed

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21/10/1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada L. 17,18 iyo 19 ee soo baxeen 1 Luulyo 1976 kuna saabsanaayeen Maamulka Guud ee Dawladda oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

ISAGOO AQOONSADAY : In Farsamada Teknolojiyada Casriga ah asaas u tahay horumarinta Dalka baahi weyne u qbto Ummadda Soomaaliyeed lagama maarmaan noqotay in la dhiso hayad u gaar madax banaan si ay farsamada teknolojiyada casriga ah ugu gaadato qayb wacan horumarinta Dalka.

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aankii Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga K. Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qod. 1aad

Waxaa sharcigan lagu dhisay Machadka Teknolojiyada Soomaaliyeed oo ah Hay'ad Madax Banaan, lehna muuqaal sharci, waxaana loo aqoonsan doonaa hadda kadib «MACHAD».

Qod. 2aad

Machadka wuxuu u hogaansami doonaa sharcigan, xeerarka la xiriira, sharciyada iyo xeerarka Wakaaladaha Madax Banaan xagga maamulka xagga nidaamka shaqada waxay la mid tahay Machadyada Cilmiga ee Dalka ka dhisan :-

Qod. 3aad

Xarunta Machadka waa magaalo madaxda Muqdisho, haddii loo baahdo waxay ka furan kartaa Laamo meelaha howlaha kaga xiranyihiin dalka gudahiisa ama dibadiisa.-

Qod. 4aad

Machadka wuxuu hoos imaanayaa Madaxtooyada oo kormeer iyo ilaalin guud ku leh.-

Machadka waxaa awood loo siiyay in uu shirkoobo Hay'ado waddani ah ama ajnabi ah haddii ay dan ugu jirto Machadka iyo qarankaba.-

Qod. 5aad

Ujeedada iyo howlaha Machadka waa sida soo socota:

b) ujeedooyinka guud ee Machadka:

i- In farsamada teknolojiyada sare loo qaado lagana faa'iideysto aqoonta casriga ah ee teknolojiyada adduunka:

ii- In lagu fidiyo farsamada teeknolojiyada aqoonyahan nada Soomaaliyeed si ay uga faa'iideystaan mustaqbalka uuna taabagelayaan waayo aragnimada ay ka helaan;

t) howlaha machadka:

i- abuurid kaadir farsamayaqaan ah oo ku xeel-dheer farsamada teknolojiyada casriga ah;

ii- in dadka ka faa'iideysto wax soo saarka teknolojiyada casriga ah dhinac waliba;

iii- in dibadda loo dhoofiyo wax soo saarka machadka teknolojiyada Soomaaliyeed ka dib marka uu dalka ka haqabeelo;

iv- machadka wuxuu awood u leeyahay oggolaanshaha ama diidmada mashaariicda la xiriirta howlihiisa, ha haadeen kuwo Hay'adaha Dowladda soo qaddimaan ama shaqsiyaad gaar ahaaneed diyaariyaan ama kuwo shisheeye u soo gudbiyaan:

v) kharajka iyo qalab u raadinta Machadka oo howlaheeda iyo ujeedooyinkeeda lagu fuliyo.

Qod 6aad

xubnaha talo goynta ee Machadku waxay ka koobanyihiin;

1) Golaha Hoggaaminta Machadka
2) Golaha Cilmi Baarista Machadka
3) Guddoomiyaha Machadka.

Qod. 7aad

Golaha Hoggaaminta Machadka waxay ka koobanyihiin:

1) Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga Gudoomiye
2) Taliyaha Ciidanka Guul/sha Ummadda Xubin

3) Guddoomiyaha Machadka Xubin

4) Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baarista ee W/G. xubin

Qod. 8aad

Howlaha Golaha Hoggaaminta Machadka waa sida soo socoto:

b) Dejinta siyaasadda guud oo howlaha machadka qabanaayo oo koobayso:

i ) Geesigelinta iyo xaqiijinta siyaasadda howlaha machadka;

ii) Lacag u raadinta iyo misaaniyada machadka;

t) La socodka howlaha farsamada ee kala duwan ee Hay'adaha Dawladda ay qabtaan;

j) ka dabatagidda iyo hubinta joogtada ah ee hirgelinta barnaamijka machadka fulinaayo;

x) talo ka soo jeedinta magacaabidda Guddoomiyaha Machadka, xeel-dheerayaasha masuul ka ah waaxyaha, farsamoyaqaannada iyo aqoonyahannada iyadoo la tixgelinaayo xeel dheernimadooda, aqoontooda ee xagga teknolojiyada casriga ah.-

kh) oggolaanshada misaaniyadda sanadka ee Machadka.-

Qod. 9aad

1.- Golaha Cilmi Baarista iyo fulinta waxay ka koobanyihiin

1) Guddoomiyaha Machadka Guddoomiye

2) Xeeldheerayaasha masuul ka ah waaxyaha Xubin

3) Farsamoyaqaannada sare iyo aqoonyahannada Sare ee Machadka oo Golaha Hoggaaminta Machadka u doortaan Xubin

2.- Guddoomiyaha wuxuu noqonaayaa masuulka Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta.

3.- Guddoomiyuhu wuxuu isugu yeerayaa, diyaarinayaa ajendooyinka shirarka kala duwan ee Machadka.-

Qod. 10aad

Xilka iyo mas'uuliyadda Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta ee Machadka waa sida soo socda:

1) Fulinta siyaasadda iyo barnaamijka guud ee Machad. ka oo ay soo dejiyaan Golaha Hoggaaminta Mahhadka;

2) Abaabulidda, soo diyaarinta, qaban qaabidda howlaha iyo u jeedooyinka guud ee Machadka ee sharcigan lagu tilmaamay, socodsiintooda iyo hirgeelintooda;

3) Waxay ka masuul yihiin ku dhaqaaqidda iyo fulinta howlaha Machadka guud ahaaneed iyo kan gaar ahaaneed ee sharcigan iyo kan Golaha Hoggaaminta Machadka ay guddoomiyaan.-

Qod. 11aad

1) Guddoomiyaha Machadka, xeeldheerayaasha mahuul ka ah Waaxyaha Machadka, farsameyaqaannada Sare iyo aqoonyahannada sare ee Machadka waxaa lagu magacaabi doona xeer uu saxiixo Madaxweynaha isa goo tixgelinaaya talo soo jeedinta Golaha Hoggaaminta Machadka ama cidda u xilsaaraan.-

2) Guddoomiyaha Machadka, iyo xeeldheerayaasha mas'uul ka ah Waaxyaha Machadka, waxay jagada hayn karaan muddo laba sano ah iyadoo loo cusbooneysiin karo.-

3) Mushaahrada Guddoomiyaha Machadka iyo xeeldheerayaasha masuul ka ah Waaxyaha Machadka waxaa lagu soo saari doona xeer Madaxweynaha soo saaro ama Xeer nidaamiyaha guud ee sharcigan.-

Qod. 12aad

b) Xilka iyo masuuliyadda Guddoomiyaha Machadka guud ahaan wuxuu la mid yahay kuwo Machadyaha Cilmiga ah, kan Maareeyayaasha Guud iyo Madaxda Hayadaha Madax Banaan, gaar ahaan wuxuu ka mas. uul yahay:

i ) Wuxuu kormeerayaa habsami u fulinta howlaha Mac. hadka;

ii) Wuxuu go'aan ka gaaraayaa nidaamka guud ee socodsiinta howlaha machadka gaar ahaan howlaha farsamo-yaqaannada, ganacsiga iyo isku xirka siyaasadda iyo barnaamijka Dawladda ka leedahay Machadka;

t ) Guddoomiyuhu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:

i ) Wuxuu ugu noqonayaa masuul Guddiga Cilmi Baarista iyo Fulinta ee Machadka si ay u fuliyaan howshooda iyo ujeedooyinka Machadka iyo habsami socodka howshaas isagoo waafijinaayo sharcigan iyo xeerarka la xiriira;

ii) Wuxuu isugu yeerayaa, diaarinayaa, ujeeddooyinka shirarka Golaha Hoggaaminta Machadka iyo Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta ee Machadka,

iii ) Wuxuu masalayaa Machadka wixii la xiriira oo dhan ama magacaabaaya ciddi kale oo beddelkiisa masili lahayd haddii Golaha Hoggaaminta Machadka amar diidaaya bixin:-

iv- wuxuu saxiixaayaa magaca Machadka hashiisyada dhinac ka ah Machadka isagoo oggolaansho ka sita Golaha Hoggaaminta Machadka ama Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta Machadka.-

v- wuxuu maamulayaa kormeerayaa howlaha cilmi baarista isagoo fulinaaya siyaasadda guud ee Dalka, go'aannada Golaha Hoggaaminta Machadka iyo Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta, wuxuuna lixdii biloodba mar warbixin ku saabsan howlaha Machadka u gudbinaayaa Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta Machadka.-

vi) Wuxuu ka qaadanaaya tilaabooyinka arrimaha ku saabsan asluubta Shaqaalaha, maamulka guud, iyo kan la xiriira xubnaha Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta haddii tilaabooyin noocaas ah sharciga, xeerarka iyo nidaamiyada hoose cid kale awoodda siinaynin

Qod. 13aad

Jagooyinka shaqaalaha Machadka waxay yihiin kuwo hoos ku xusan:

1) Guddoomiyaha Machadka (Madax Agaasin Guud)

2) Xeeldheerayaasha masuul ka ah Waaxyaha

3) Farsamoyaqaannada Sare iyo aqoonyahannada Sare

4) Shaqaalaha Caadiga ah oo awood waxbarashada qaadan karo:-

Qod. 14aad

1) Mushaaharooyinka iyo gunooyinka shaqaalaha kala duwan ee Machadka waxaa lagu soo saari doonaa Xeer Nidaamiye oo u saxiixo Madaxweynaha isagoo tixgelinaaya talada Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta Machadka;

2) Dallacsiinta shaqaalaha Machadka waxaa oggolaanshaheeda leh Golaha Hoggaaminta Machadka, isagoo tixgelinaaya talada u soo jeediyo Guddoomiyaha Machadka;

3) Darajo ka gaadidda shaqaalaha Machadka iyadoo halkii sanab mar la sameenaayo qiimaynta guud ee Shaqaalaha waxaa guddoominaaya Golaha Hoggaaminta

Machadka ama cidi ay u wakiishaan.

Qod 15aad

Howlgabka iyo Liilitirka la xiriira shaqaalaha Machadka waxaa lagu dhaqayaa sharciyada arrimahaas khuseeya oo lagu maamulo shaqaalaha Dwladda.

Qod. 16aad

Maaliyadda dakliga ee Machadka waxay noqonaysaa:

1) Kaalmo joogto ah oo Dawladda u fidiso;

2) Raasumaal oo la gasho sharikadaha Adduunka;

3) Faaidada wax soo saarka ee Machadka.

Qod. 17

Wixii machadku leeyahay waxaa masuul ka ah Guddoomiyaha Machadka isagoo u xilsaari doona kala habaynta iyo habsami u maamulka sarkaal ka madax ah maamulka lacagta.
Lacagtaas waa in lagu keydiyaa Bankiyada Dalka ka furan.

Qod. 18aad

Guddoomiyaha Machadka marka ay tahay 30 Oktoobar ama inta ka horaysa sanad kasta waa inuu isku duba ridaa miisaaniyadda ku saabsan sanadka maaliyadda soo geleyso isagoo faahfaahinaayo kuna muujinaayo lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Machadka sanadka soo socda.

Wuxuuna soo hordhigayaa Golaha Hoggaaminta Machad-

ka si loo oggolaado ka dib mar ay go'aan ka gaaraan gudbintaas Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta.

Qod. 19aad

Guddoomiyaha Machadka marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horeeysa sanad kasta waa inuu isku duba ridaa miisaaniyadda xiritaanka ee sanadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajiyay xisaabihii sanadka iyo bandhigii macaashka si ay u oggolaadaan Golaha Hoggaaminta Machadka.

Qod. 20aad

Machadka wuxuu awood u leeyahay inuu qorto shaqaale shisheeye markii ay lagama maarmaan noqoto iyadoo la tixgelinaaya Xeerka L. 33 ee 25 diseember 1978 iyo sharciyada kale.

Qod .21aad

Iyadoo aan la burin sharciyada jira oo ku saabsan Cashuuraha iyo waajibaadka kale ee Hayadaha Dawladda dulsaaran, Machdka Teknolojiyada Soomaaliyeed wax canshuur ah iyo waajibaad kama bixinayaan Hantida uu soo wareegsanaayo ama gadanaayo oo sahlayso fulitaanka howsha iyo wax soo saarka Machadka.

Qod. 22aad

Madaxweynaha wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaayo talada u soo jeediyo Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta Machadka inuu guddoomiyo Xeer guud oo saameeya nidaamka iyo habsami u hirgelinta howlaha Machadka iyo kaa shaqaalaha Machadka.

Qod.23aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 1 Jannaayo 1979.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho 19 Febraayo 1979

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 7 ee 19 Febraayo 79, Billadaha Maamuuska Milleteriga

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY: Xaashida Koowaad; tan labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY:- Sharciga lamb. 1 ee Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in wax laga bedelo Sharciga Tr. 5 ee 30 Jannaayo 1963 ee ku saabsan Abaalmarinta Militeriga.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 17; 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Waxaa la dhisay habka Billadaha Maamuuska Militeriga oo lagu Abaalmariyo falalka gaar ahaaneed ee Geesinimada Militeriga; si loo muujiyo in falalku mudan yihiin xushmad guud; isla markiibana tusaale dhiiri gelin u noqda Xubnaha kale ee Ciidammada.

Qod. 2aad

Billadaha Maamuuska Militeriga waxay yihiin:-

— Xiddigta Geesinimada Soomaaliyeed

— Billada Dahabka ah

— » Qalinka ah

— » Maarta ah

— » ka qayb galka Dagaalka.

Qod. 3aad

Billadaha Maamuuska Militeriga waxaa la guddoonsiinayaa dadka, ayagoo ku kacay fal Geesinimo leh oo samayntiisa haddii la dhaafo aan waxba u dhimaynin Sharciga iyo waajibka, kana hortaga khatar weyn ee u muuqata halisna gelin karta naftooda xilli Dagaal.

Guddoonka Maamuuska Billadaha waxaa la bixin karaa oo keli ah, marka falka la sameeyey haddii dhan kasta laga eego uu yahay mid lagu dayan karo.

Qod. 4aad

Billada Dahabka, Qalinka, Maarta ee Militeriga waxaa la guddoonsiin karaa Xilli Nabadeed, markii ay jiraan sifooyinka ku xusan Qodobka 3aad.

Qod. 5aad

Waqtiga nabadda sifooyinka falka Geesinimo waa inay noqdaan kuwa la xiriira waajibaadka loo dhisay Ciidammada sikasta ha ahaatee sifada qofku sameeyay.

Haddii falka Geesinimo yahay mid la xiriira xirfaddiisa ama yahay mid naxriisi ka keentay, kana baxsan hawlaha loo dhisay Ciidammada, waxaa la siiyaa Abaalgud nooc kale ah xataa haddii qofku ka mid yahay Ciidammada.

Qod. 6aad

Darajada Maamuuska Billadaha Militeriga waxaa lagu qiimeeyaa hadba inta qofka sameeyey la eg yahay, kaana waxaa muujinaaya waxyaabaha uu ka kooban yahay falku, niyadda sare uu muujiyay, khatarta uu ka hortagay iyo guud ahaan natiijada ka soo baxday.

Geerida iyo dhaawacyadu waxay muujinayaan khatarta uu qofku galay, hase yeeshee intaasi oo keli ah uma noqon karaan saldhig maamuus Billadeed, waana in aan loo samayn falka qiimayn uusan lahayn; laakiin waa in la tixgeliyaa waxyaabo fara badan oo khusaynaysa qiimaynta.

Qod. 7aad

Bixinta Billadaha Maamuuska Militeriga waxaa Guddoomiya Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee ah Taliyaha Sare Ciidammada Qalabka Sida, waxaana lagu soo saaraa Xeer Madaxweyne.

Madaxweynuhu waqtiga Dagaalka wuxuu awood u leeyahay in bixinta Billadaha uu wakiisho Madaxda Sare ee Ciidammada, asagoo ka dib ku soo saaraya Xeer.

Haddii Madaxweynuhu uusan si toos ah u soo saarin, Xeerka bixinta Billadaha Maamuuska Militeriga waxaa soo jeediyaa Wasiirka Gaashaandhigga.

Qod. 8aad

Soo jeedinta Abaalmarinta Militeriga shaqadda haya waxay ka imaan kartaa Taliyaha tooska u xukuma ama Taliye isaga ka sarreeya.

Soo jeedinta, iyadoo ay ku lifaaqan yihiin war-bixinnada loo baahan yahay ee caddeynaaya waxyaabaha qiimaha leh iyo Falka uu qofku sameeyay, meesha uu ku sameeyay, waxay soo maraysaa habka kala sarraynta, si qof walibk ee Madax ahi uga dhiibto ra'yigiisa.

War-bixinnada waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Gaashaandhigga muddo ku siman saddex Bilood gudaheeda laga billaabo marka uu falku dhacay.

### Qod. 9aad

Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga uu u bandhigayaa Madaxweyñaha waxaa saldhig u ah ra'yiga Guddi loo magacaabay arrintaas, wuxuuna fikrad ka dhiibanayaa mudnaanta bixinta iyo Darajada Abaalmarinta Billadda Maamuuska.

Guddiga Abaalmarinta Billadaha Militeriga wuxuu ka koobán yahay :-

1- Abbaanduulaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

2- Affar Sarkaal Sare ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

3- Laba Sarkaal Sare ee ka tirsan Ciidanka qofka la abaalmarinayo.

Guddigu waxaa la isugu yeeraa Xeer hoosaad uu soo saarayo Wasiirka Gaashaandhigga.

### Qod. 10aad

Militeriga shaqada ka fariistay ama dad kale ee sameeyay fal qiimo Militeri ah ee ka baxsan C.Q.S. Abaalmarinteeda waxaa soo jeediya Madaxda Militeriga ee meesha falku ka dhacay, waqtiga iyo habka soo jeedintaas waxaa la raacayaa Tusaalooyinka ku xusan Qodobka 8aad.

### Qod. 11aad

Soo jeedinta aan la oggolaan lagama dacwoon karo. Sidoo kale ma bannaana in loo dacwoodo, si lagu helo isla falka Maamuusid ka Daraja Sarreysa midda horay loo guddoonsiiyay.

### Qod. 12aad

Hadduu qof samaynaya fal qiimo militeri leh uu u Geeriyoodo Geesinnimadiisa darteed ama si kastaba ha ahaatee uu falka ka dib dhintay, Billadda Maamuusidda waxaa loo bixin karaa xusuus ahaan.

Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda Militeriga loo bixiyey xusuusta qofka dhintay waxaa la guddoonsiiyaa ilmaha kan ugu weyn, Aabihiisa, Hooyadiisa ama Afadiisa.

Markii la waayo Ehelada la soo sheegay, Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda waxaa la guddoonsiiyaa colkii uu ka tirsanaa.

Haddii uu Geeriyoodo qofka la guddoonsiiyay Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda ee loo bixiyay xusuus ahaan, isu gudbinta lahaanshaha Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda waxaa lagu dhaqmayaa Qawaaniita Dhaxalka u degsan. Isla Qawaaniinta iyada ah waxaa lagu dabaqayaa, xataa haddii uu dhinto qofka horay u haystay Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda.

Qod. 13aad

Falka qiimaha Militeriga leh ee dhowr jeer dhaca, haddii aan lagu maamuusin Abaalgud kale, waxaa midkiiba la guddoonsiin karaa Billad Maamuus, iyada oo aan tiradeeda la xaddadin.

Qod. 14aad

Billaddu waxay leedahay dhexrood cabbirkiisu yahay 35mm, dhinac waxaa kaga xardhan Magaca Qofka lagu Maamuusay, meesha iyo taariikhda falku dhacay, waxaana ku wareegsan xirmo Cawbaar ah, dhinaca kale waxaa ka xardhan Astaanta Qaranka ee muujinaysa Gaashaan iyo laba Waran oo isdhaafsan.

Xiddigta Soomaaliyeed waa DAHAB, waxayna leedahay dhexroor Cabbirkiisu yahay 35mm, dhinaca dhexda waxaa kaga xardhan magaca qofka lagu maamuusay, meesha iyo taariikhda falka dhacay, dhinaca kale waxaa kaga xardhan qoraal ah «GEESINIMO».

Qod. 15aad

1. Billaddu waxay wadataa Xaasaw midabkeedu yahay Buluugga, Calanka lehna jiitin u dhaxaysa oo cad, ballaceedu yahay 37mm, Xaasaw cabbirkeedu yahay 5mm, waxaa lagu qaataa dhinaca Bidixda ee xabadka.

2. Marka aan Billadda la qaadanayn waxaa labbiska Militeriga lagu qaataa dhinaca Bidixda ee Xabadka Xaasawda yar oo cabbirkeedu yahay 37mm, x 10mm, waxayna dhexda ku wadataa Xiddig yar oo Dahab ah kuwa leh Billad.

da Dahabka ah; Xiddig yar oo Qalin ah kuwa leh Billadda Qalinka ah; Xiddig yar oo Maar ah kuwa leh Billadda Maarta.

3. Dadka leh Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed waxay qaataan Xaasaw yar ee cabbirkeedu yahay 37mm, x 10mm waxayna dhexda ku wadataa Xiddig yar oo Dahab ah oo dhextaal Koobaabin.

Qod. 16aad

1. Dadka lagu Abaalmariyay Billadaha Militeriga marka ay sitaan dharka rayidka ah waxay Askarta Gaarka ah xaq ugu leeyihiin Salaan Militeri.

2. Militeriga la Abaalmariyay oo sita dharka militeriga waxay salaan xaq u leeyihiin kuwa la Darajada ah.

Qod. 17aad

1. Billadaha Maamuuska Militeriga waxaa la guddoonsiin karaa oo kale Horin madax bannaan, Dhismo Militeri, Urur iyo wixii ka sarreeya ee si wadajir ah u soo hooyey Xilli Dagaal Guul qiimo Militeri leh.

2. Billaduhu waxay ka lushaan Calanka ama Calaamada Colleeyahay.

Qod. 18aad

Billad kasta ee Maamuus Militeri waxaa la guddoonsiiyaa Sannadkiiba Lacagta Billad kasta ku hor qoran:-

| | | |
|---|---|---|
| Xiddigta Geesinnimada | Sh. So. | 6.000 |
| Billadda Dahabka | Sh. So. | 1.080 |
| Billadda Qalinka | Sh. So. | 720 |
| Billadda Maarta | Sh. So. | 360 |

Qod. 19aad

Lacagta ku qoran Qodobka 18aad waxaa la siiyaa mutaystaha. Lacagta mutaystaha lagama ceshan karo, xaraashi karo, asaguna cid kale kuma wareejin karo.

Qod. 20aad

Xiddigta Geesinnimada waxaa mutaysta Qofka sameeya fal qiimo weyn u leh Qaranka ama ka hortagay fal wax u dhimi kara jiritaanka Qaranka.

Qod.21aad

Qofkii isagoo nool mutaysta 2 iyo in ka badan Xiddigta Geesinnimada waxaa inta uu nool yahay Taallo looga dhisayaa Magaalo Madaxda.

Qofkii isagoo horay u mutaystay hal Xiddigta Geesinnimada dhinta wuxuu xaq u leeyahay in Taallo looga dhiso Magaalo Madaxda Gobolka uu ku dhashay.

Mutaystayaasha Xiddigta Geesinnimada waxaa lagu magacaabi karaa Magaalo, Iskuul, Waddo, Xero Militeri IWM.

Qofkii mutaysta saddex Billad Dahab waxaa Taallo looga dhisayaa Magaalo Madaxda.

Qod. 22aad

Billadaha Maamuuska waxaa lagu guddoonsiiyaa Xaflad weyn Maalmaha Ciidaha Qaranka, ayadoo colku kulansan yahay. Billadaha waxaa lala baxshaa Shahaado uu saxiixay Madaxweynahaayna ku qoran tahay sababta loo siiyay oo kooban.

Qod. 23aad

Mutaystaha waxaa laga qaadayaa Billadaha Abaalmarinta marka uu ku kaco fal lid ku ah jiritaanka Qarannimada. Kala noqoshada Abaalmarinta waxaa lagu soo saaraa Xeerka Madaxweynaha Jahuuriyadda.

Qod. 24aad

Mustaystayaasha Billadaha Dahabka ah marka ay Geeriyoodaan waxaa lagu magacaabayaa ISKUUL, Waddo Xero Militeri, IWM.

Qod. 25aad

Qofkii muddo 10 (toban) Sano ah Ciidammada ka mid ahaa muujiyayna Anshax iyo Asluub wanaag waxaa la guddoonsiinayaa «Billadda Shahaada waqtiga dheer» ka dibna 5tii Sano mid la mid ah, ayaa la siinayaa.

Qod. 26aad

Mutaystayaasha Billadaha Ciidammada waxay xaq u leeyihiin tahiilaadka la siiyo Abaalmarinta u dhigma ee ku xusan Qod. 12aad ee Sharciga tir. 65. ee 19ka Oktoobar 1970kii.
Muqdisho, 19. 2. 1979

Qod. 27aad

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa maalintii uu saxiixo MADAXWEYNAHA J.D.S.

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYEED
Jaalle Maxamed Siyaad Barre

## QAYBTA LABAAD
## XEER

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD L. 17 ee 1 Febraayo 1979 qaadid Guryo dan Guud awgeed ee waqti hore uu lahaa SHARIIF SAALAX XASAN CUMAR oo ay la wareegtay BANKIGA HORUMARINTA SOOMAALIYEED kuna yaal Muqdisho — Degmada Shingaani.

WASAARADDA HAWALAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

ANNAGOO ARGNAY: Xaanshada koowaad tii labaad iyo tii seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 ee 1° Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Setembere 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY: Qoraal (ATTO) 7812 Rep. taariikh 26.1.1977 lagu diiwaan geliyey Xamar 1.12.77 lamb. 271 Att Pubblici Vol. 2 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Maxamed Xasan Jasti taas oo BRERA ALFREDO wuxuu ka gaday kuna wareejiyey SHARIIF SAALAX XASAN CUMAR wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihiis ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1046,50/= looguna isticmaalo Xafiisyo, Ufficina iyo Dukaammo — kuna yaal Muqdisho — Degmada Shingaani;

ANNAGOO ARAGNAY: Qoraal (ATTO) lamb. 7813 Rep. taariikh. 26.11.1977 lagu diiwaan geliyey Xamar 1.12.1977 lamb. 272 Atti Pubblici Vol. 22, oo ah caddeynta Notaayayada Dr. Maxamed Xasan Jasti taas oo BRERA ANTONIETTA wuxuu gaday kuna wareejiyey SHERIIF SAALAX XASAN CUMAR wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya m. 13 dhirir oo ah m. 8,90 oo balac ah, kana kooban sida guri degmo iyo rimessa, kuna yaal Muqdisho — Degmada Shingaani;

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda lamb. yahay 295/XHK/AM taariikdeeduna ahayd 23 Setember 1978 oo ka soo baxday Shirkadda FIMA, kana muuqato in guriyaha ay la wareegtay Dawladdu;

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda lamb. MJDS/S/75 — 59 taariikhdeeduna ahayd 15/1/1979 ee ay soo qortay MADAXTOOYADA oo ay ku amrayso in loo sameeyo xeer (Dekereeto) si loo siiyo magdhowga qofka guryaha leh;

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda qiimeynta guryaha oo ay soo sameeyeen Guddi loo xilsaaray kana kooban :- JEOM. XASAN CUMAR, JEOM. CABDULQAADIR CUSMAAN iyo JEOM. MAXAED JIBRIIL kana tirsan WAKAALADDA HINDISAHA SOOMAALIYEED taasoo muujinayso qiimaha Guryaha in uu yahay lacag dhan Sh.So. 1.030.797, 50/= hase yeeshee laga jaray qiimaha dhan ahaan Sh.So. 412.319/= oo u dhiganta 40% qiimaha asalka ee Guryaha sidaasne dhamaadka noqday lacag dhan Sh.So., 618.478 50/= (Lix boqol iyo toban iyo sideed kun afar boqol todobaatan iyo sideed iyo 50/Senti) eeg qiimaynta halkaan ku lifaaqan;

## XEER

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday Dan Guud awgeed Guryaha uu lahaa SHARIIF SAALAX XASAN CUMAR, iyadoo loo celinayo magdhow gaaraya Sh.So. 618.478, 50/= (Lix boqol toban iyo sideed kun afar boqol todobaatan iyo sideed iyo 50/ Senti). Isla markaas waxaa la caddeynayaa in qiimahaas uusan jirin kan dhulka.

Lacagta kor ku qoran waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed.-

Muqdisho, 1 Feb. 1979.-

WASIIRKA WASAARADDA HAWLAHA GUUD

W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR

GUDD. BANKIGA H. SOOMAALIYEED
W. S. Dr Cumar Axmed Cumar

Waan Aragnay ee Diiwaangelinay,
Diiwaanka Lambar 1 bogga lamb. 3.
Muqdisho, 6 Feb. 1979.
Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud
Sax. Xuseen Cabdulle Cali

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA L. 18 ee 5 Feb 1979, Xeer Nidaamiye Farsamayaqaanada Isgaarsiinta

WASIIRKA WASAARADA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 20 ee 20 Juunyo 1976kii

WUXUU SAXIIXAY XEER NIDAAMIYAHA SOO SOCDA:

## MADAXA 1aad

## (CENTRAL PROVISION)

### Qodobka 1aad

UJEEDDADA MACHADKA

Ujeeddada Machadku waa in la tababaro farsamoyaqaanno Isgaarsiineed ee lagu tababaro teknolojiyada Isgaarsiinta, loona carbiyo dhammaan waaxyaha kala geddisan ee Dawladda oo u baahan kara dadka noocaas ah.

### Qodobka 2aad

FURITAANKA MACHADKA

Waxa Machadkan si rasmi ahaan ah loo aqoonsaday 28kii Juun 1976kii, wuxuuna ka hawlgalay tababarkii ugu horreeyey bishii Nofembar 14dii 1974kii.

### Qodobka 3aad

WASAARADDA HAWLWADEENKA KA AH:

Waxa Machadkaan hawlwadeen ka noqon doona, ama hoggaamintiisa yeelan doona, Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta iyadoo ay kaalmaynayso sannadaha hore ee habayntiisa lagu jiro, Ururka Isgaarsiinta Adduunka (ITU), iyo xiriirka Iskaashiga Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Jarmalka iyo Jamhuuriyadda Soomaaliyeed. ee

### Qodobka 4aad

GUDDI FARSAMEEDKA XIRIIRINTA:

Waxaa la sameyn doonaa Guddiga Xiriirinta, sida ku sheegan Lifaaqa 2aad, oo kala talisa Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta Qorshaynta iyo siyaasadda Machadka.

Qodobka 5aad

AGAASIMAHA MACHADKA:

Agaasimaha Tababarka Wasaaradda Boostada io Isgaarsiinta ayaa noqon doona Agaasimaha Machadka, wuxuu mas'uul ka noqon doonaa sida habsamida ah ee Machadka loo socodsiinnayo.

Qodobka 6aad

TABABARRADA:

Laba tababar oo waaweyn ayaa ka socon doona Machadka.

1. a) Tababarro Guud ee asaasi ah oo khuseeya dadka arday ahaan ku soo gala.

   b) Tababarro takhasuska qalabka ah ee ay qaadan doonaan ardayda ku guulaysata tababarada isgaarsiinta guud.

2. Tababarro gaar ahaaneed ee gaagaaban ee shaqaalaha (in-service traing)

Qodobka 7aad

TABABARKA AASAASIGA AH EE ISGAARSIINTA GUUD.

7) I. Nooca Tababarrada: Tababarrada aasaasiga ah ee isgaarsiinta guud waxay ka koobnaan doonaa aqoonta aasaasiga ah oo dhan xag tiyeeri iyo xag gacan-ka-qabashaba (threery an practice).

7) II QAADASHADA ARDAYDA: Qaadashada joogtada ah ee sannadeed waxay ku xiranaan doontaa baahida iyo qorshaha waaxyaha Dawladda. Ardaydaas oo ah kuwo ku soo guuleystay imtixaanka weyn ee Dugsiga Dhexe lagaga baxo. Qaadashaduna waxay ku imanaysaa tartan qoran ee la qabto marka natiijada imtixaanka dugsiyada Dhexe la soo dhejiyo. Dadka araajida soo qortana waxa lagu imtixaanayaa maadooyinka hoos ku qoran.

1) Luqooyinka: Ingiriisi iyo Soomaali

2) » X I S A A B.

3) » S A Y N I S.

Dabadeedna waxaa soo bixi doona liis ah siday natiijadii imtixaanka ugu kala horeeyaan.

Dhammaan ardayda sidaas lagu qaatay waxay saxeexi doonaan Warqadda Heshiiska sida ku xusan (Lifaaqa 1aad) inta aanay bilaabin tababarkooda.

7.) III. BILAWGA TABABARKA: Tabarka aasaasiga ah ee isgaarsiinta guud wuxuu bilaabmi doonaa lix bilood ka dib markuu dhamaado. tababarka luqa-da oo ay barbar socdeen maadooyin Saynis ah (preparatory coure)

7. IV. WAKHTIGA TABABARKA: Tababarrada aasaasiga ah ee isgaarsiinta guud waxay socon doonaan muddo 2 sano ah iyadoo kala qaybin doono 6 bilood form walba.

Qodobka 8aad

TABABARKA TAKHASUSKA QALABKA:

I. Noocyada Tababarrada takhasuska qalabka: Tababarka takhasuska qalabku waxay koobi doonaan rakibida socodsiinta iyo dayactirka qalabka takhasuska oo ay isticmaalaan Wasaaradaha Dawladda iyo waaxyaha kale oo ku shaqeeya.

a) isgaarsiinta dayaxgacmeedka
b) Line oy site and Troposheric sacatter Microwave Radio relay systems.
c) High frequency and very high frequency Radio Links.
d) Air and marine Navigational Aids.
e) Television and sound Broadcasting.
f) Telephone Exchange switching.
g) Teleprinters and Telex Exchanges.
h) Power Systems.
i) local Line Planning.

II. Qaadashada Ardayda Takhasuska:

Ardayda loo qaadanayo tababarrada takhasuska qalabku waa ardaydii ku soo guulaystay tababarka aasiga ah ee isgaarsiinta guud. Waxaa kaloo la qaadan karaa farsamoyaqaannada u qalma heerkan.

III. BILOWGA TABABARKA: Tababarka takhasuska qalabku waxay bilaabmi doonaan ka bacdi markay tababarada asaasiga ah ee isgaarsiinta guud dhammaadaan, ardayduna soo maraan Dugsiga Xalane ama shaqada Qaranka marba sidii waafaqsan siyaasadda Dawladda.

Bilaabidaas oo ku xiran helitaanka macalimiin munaasib ah oy waxbarasho iyo qalabkii takhasuska.

IV. WAKHTIGA TABABARADDA.

Tababarada Takhasuska Qalabku waxay noqon doonaan

muddo hal sano ah, iyadoo ay 6 bilood oo hore noqon doonaan barashada xirfadaha sare ee isgaarsiineed oo waafaqsan mudabarashada xirfadaha sare ee isgaarsiineed oo waafaqsan maadada, 6da oo kalena noqon doonaan tababarka barashada qalabka 6da bilood oo dambe iyana ku jira ama la socda tegid goobaha shaqada oo lagu kormeeri doono.

Qodobka 9aad

TABABARO XIRFADEED OO GAAGAABAN:

Tababarada xirfadeed waxay koobi doonaan shaqooyinka farsamo hoosaadka ah waxayna khusayn doonaan shaqaalaha ka shaqeeya ama u shaqayn doona Wasaaradaha Dawladda ee kala geddisan iyo hayadaha kale oo ku shaqeeya qalabka isgaarsiinta. Tababarrada noocaas ahi waxay koobi doonaan laguna qorshayn doonaa marba shaqooyinka ay shaqaalaha tababarka qaadanayaa qaban doonaan, wuxuuna u badan doonaa tababarku gacan-ka-qabad.

I. QAADASHADA ARDAYDA

Ardayda ka qayb galaysa tababar Xirfadeedka gaagaaban waxa soo magacaabi doona Wasaaradaha iyo Waaxyaha kala geddisan Heerka aqooneed ee tababarka lagu soo gelayo waxaa sugi doona Agaasimaha Machadka isagoo la tashanaya wakiilada Wasaaradaha Dawladda iyo hayadaha soo magacaabay shaqaalahaas.

II. BILOWGA TABABARKA

Tababarada xirfadeed waxay bilaambi doonaan ka bacdi marka la helo liiska ardayda tababarka qaadanayaa iyo marka la helo barayaal, hoy waxbarasho iyo qalab tababarka lagu sameeyo.

III. WAKHTIGA TABABARKA

Wakhtiga tababarada xirfadeed ee gaagaaban waxay ku xirnaan doonaan nieeddada tababarka iyo maadooyinka barnaamijku ka kooban yahay, laakiin waa inaanay sinaba uga badan lix Bilood.

Qodobka 10aad

BARNAAMIJKA (SYLLABI)

Barnaamijyada tababarada cusub iyo kabidda barnaamijka jira ee lagu shaqeeyo hadday duruufta isbedelaysa lagama maarmaan ka dhigto waxa samayn doona Agaasimaha Machadka isagoo la tashanaya wakiilka waaxyaha arrimuhu khuseeyaan iyo xubnaha shaqaalaha Machadka.

Qodobka 11aad

BIXINTA SHAHAADOOYINKA

Markuu arday kasta dhammaysto foorm tababarka asaasiga isgaarsiinta guud ah, wuxuu/waxay heli doonaa/doontaa warqad caddeyn ah oo ay ku qoran yihiin natiijooyinkiisii oo dhan ee u foormkaas kaga baxay. Shahaado meel mar ahna wuxuu/waxay/ heli doonaa doontaa markuu ku guulaysto.

a) Fasalka (foorm) afraad ee isgaarsiinta guud, shahaadadaas oo la heer ah shahaadada Dugsiga Sare ee afar sanoo caadiga ah,

b) Tababarka takhasuska qalabka, Shahaadadaas oo la heer ah 2 sanoo ka sareysa waxbarashada Dugsiga Sare.

c) Dhammaan Tababarrada Xirfadeed ee gaagaaban.

Qiimeynta shahaadooyinka tababarrada Xirfadeed ee gaagaaban waxa samayn doona Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta iyadoo la tashanaysa Wasaaradda farsameedka ay khusayso iyo hayadaha kale ee ku lug yeelan kara arrimahaas.

Qodobka 12aad

SHARCIGA MACHADKA:

Machadku wuxuu ku socon doonaa sharciga ku xusan lifaaqyada halkaan ku taxan, kaddibna beddelaadda sharciyadaas oo ay mastaqbalka soo socda duruuftu lagama maarmaan ka dhigto waa in aanay sina ukhilaafin mabaadi'ida Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed oo danaynaya qaranimadiisa iyo ummaddiisaba. Sharciyada yar-yar ee darveelaya socodsiinta hawl-maalmeedka Machadka waxa marba soo saaridoona saxiixina doona Agaasimaha Machadka ka bacdi markuu la tashado Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta iyo barayaasha waayo aragga ah.

Qodobka 13aad

MAALIYADDA:

Maaliyadda Machadka waxa sannad walba diyaarin doona Agaasimaha Machadka.

Qodobka 14aad

## WASIIRKA WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

AGAASIMAHA GUUD EE WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

GUDDIGA XIRIIRKA

KU XIGAHA AGAASIMAHA Isgaarsiinta guud faraca — AGAASIMAHA MACHADKA — SHAQAALAHA MACHADKA

| BARE SARE | BARE SARE | BARE SARE | BARE SARE | BARE SARE | BARE SARE |
|---|---|---|---|---|---|
| diridda & radio farac dayaxgacmeed microwave transmission. | telefoonka (exchanges) faraca telephone power | kaalmooyinka badda faraca duulista & hawada marine | faafinta codka farac codka television | telex & teleprinter farac teleprinter telex | local line planning & vocational local line planning courses |

Fiiro Gaar: Agaasimaha Machadka iyo ku-xigeen kiisuba waxay noqon doonaan saraakiil carbisan oo shahaado jaamaceed haysta kana tir san Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta. Baraha Sare ee horjoogaha ka ah faarac walba wuxuu noqon qof munaasib ah oo u carbisan faracaas, marka laga Waxbarashadiisa iyo khibrad gacmeedkiisa shaqada waxaana kaalmayn doona barayaal iyo tusayaal (d emonstratore) marba inta loo baahrdo si uu u dhamimaystiro tababarada wakhti walba.

Barayaasha iyo tusayaasha waxaa faraca isgaarsiinta guud loogu qori doonaa marba baahida wakhtigu siday tahay.

Qod. 15aad

TALLAABO QAADKA ARDAYDA TABABARRADA ISGAARSIINTA GUUD & TAKHASUSKA:

Ardayda soo gudbaa waa shaqo tegayaan.

| | |
|---|---|
| Tababarka takhasuska Tababarka Qalabka | Magudbaha (below 50% waa inuu dib u qaataa tababarka takhasuska. |
| Tababarka takhasuska Isgaarsiinta Sare | Magudbaha ka hooseeya 50% waa inuu dib u qaataa qaybtaas. |
| Farsamoyaqaano waxbarasho ahaan ku qalmo inay ka qayb galaan. | |
| Isgaarsiinta guud formka IV. | Magudbaha ka hooseeya 40% waa in la cayriyaa kuwa 40 — 44% keenay ha ku noqdaan formkaas. |
| Isgaarsiinta guud formka III | Magudbaha ka hooseeya 40% waa in la cayriyo kuwa 40 — 44% keenayna ha ku noqdo formkaa |
| Isgaarsiinta guud formka II | Magudbaha ka hooseeya 45% waa in la cayriyo |
| Isgaarsiinta guud forka I | Magudbaha ka hooseeya 45% waa in la cayriyaa. |

Qaadashada sannadeed oo ku soo guuleystay imtixaanka dugsiga dhexe ee tartan Machadka lagu qabtay ku soo galay. FIIRO GAAR: Ardayda laga cayriyo Machadka kartidarro waxbarasho wgeed gaar ahaan formka III & IV, haddii dabeecaddoodu fiican tahay waa in loo qaataa hawlaha farsamada hoose ee wasaaradaha Dawladda ee isgaarsiineed loo furaa tababarro xirfadeed ee gaagaaban.

Qodobka 16aad

Wuxuu sharcigaani hirgeli doonaa Marka Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiintu soo saxeexo.

Waxaa saxeexay Sharcigaan: Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad
Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

# LIFAAQA N. 1

## WARQADDA HESHIISKA

(XURUUF WAAWEYN)

MAGACA ARDAYGA ————————————

TAARIIKHDA DHALASHADA ————————————
CINWAANKA GURIGA ————————————

CINWAANKA HADDEER ————————————

HADDUU KA DUWAN YAHAY KAN GURIGA ————————

WAALIDKA/AMA QOFKA MASUULKA KA AH ———————

## CADDEYN

Anigoo ah ardayga hoos ku saxeexan waxaan halkan ku caddeynayaa adkaynayaana inaan u hoggaansanaayo duruufta iyo shaqooyinka Machadka Tababarka Isgaarsiinta Qaranka una bushin-tuurmaayo qanuunka iyo sharciga u degsan.

Waxaan kaloo caddeynayaa adkaynayaana inaan markaan dhammaysto tababarkayga isgaarsiinta aan u shaqayn doono Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed sida marba la igu amro.

Waxaan kaloo caddeynayaa adkaynayaana in inta tababarka ii socdo iyo marka aan shaqada tagoba inaan dalka ugu shaqaynayo si furfuran oo daacadnimo ah si kastoo ay duruuftu iga keentaba, kana qayb gelayo hawlaha iskaa-wax u-qabsada iyo hanuunınta markii la iiga baahdoba.

Waxaan kaloo aqoonsanahay in haddii alaab Dawladdu leedahay igu jabaan, ama igu lumaan xaq la iigu leeyahay in la warsado qiimaheedii anan gudo, ama la iga jaro gunnadayda ilaa aan wada gudo qiimihii sheyga. Waxaana halkaan ku caddeynayaa inaan ku kalsoonahay diyaarna u ahay.

Saxeexa Ardayga

————————————

Taariikh

————————————

Fiiro Gaar :- waa in warqaddan la buuxiyaa maalinta ugu horeysa ee tababarku bilaabmo laguna xafidaa galka ardayga buuxiyey (FF/_) foomkaan.

## LIFAAQA 2aad

## GUDDIYADA MACHADKA TABABARKA ISGAARSIINTA QARANKA

Labadaan Guddi ayaa la samayn doonaa si ay uga kaalmeeyaan Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta dejinta siyaasadda Machadka, dhowridda iyo hagaajinta heerka tababarrada Machadka.

a) Guddi farsameedka Xiriirinta
b) Guddi Farsameedka Qiimeynta.

Shaqooyinka, mas'uulyada iyo xubnaha guddiyadani waxaa lagu caddeeyay hoos:

a) Guddi Farsameedka Xiriirinta

Guddigani wuxuu mas'uul ka noqon doonaa inuu kala tasiiyo Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta qorshaynta iyo siyaasadda Machadka iyo hirgelinta siyaasadaha la isla gaaray. Wuxuuna yeelan doonaa awooda inuu u soo jeediyo Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta wixii sharciyo cusub ah ee loo baahanyahay, ama soo jeediyo wixii kabid ama beddel ah ee lagu samaynayo sharciga jira taasoo ay keentay duruufta is rogrogaysa iyadoo mar walba la tixgelinayo in kabidaas ama sharciyadaas cusubi waafaqsanyihiin mabaadi'dii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Guddigu wuxuu ka koobnaan doonaa xubnahan:

1) Agaasimaha Machadka (Guddoomiye).
2) Ku-xigaha Agaasimaha Machadka
3) laba sargaal oo ay soo magacowday Wasaaradda Boostada iyo Isgaariinta
4) Sargaal ka yimid Wasaaradaha la xiriira Machadka (i. e. Wasaarad kasta oo u baahan inay Machadka ka hesho farsamoyaqaanno carbisan)
5) Sargaal ka tirsan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
6) Sargaal ka tirsan W. Shaqada iyo arrimaha Bulshada
7) Maareeyaha Mashruuca Machadka ee ITU
8) Horjoogaha kooxda Tababarrada ee G. D.P.

Maareeyaha Mashruuca iyo Horjoogaha kooxda G.D.R waxaa hadhow bedeli doono barayaal waayo arag ah oo loo magacaabay.

Guddigu wuxuu shiri doonaa 4tii biloodba mar, shirarkaas waxa wargelin doona xubnaha Agaasimaha Machadka laba asbuuc ka hor, shirarkaasna waxa la qaban doonaa bilaha Janaayo April July iyo Oktoober ee sannad walba

Shirarka khaaska ah haddii loo baahdo waxa guddiga isugu yeeri karaa Agaasimaha Machadka.

Qaraaraadka shirarka waa la xafidi doonaa waxaana loo gudbin doonaa xubnaha guddiga iyo Wasaaradda la xiriirta muddo ku siman laba asbuuc gudaheed markii shirarka laqabtay.

## LIFAAQA NO. 3

## INTIXAANNADA IYO QIIMAYNTA

Sharcigaani wuxuu tifatirayaa hababka la raacayo wakhtiyada imtixaannada iyo qiimaynta ardayda ilaa muddada ay tababarka Machadka ku jiraan.

### IMTIXAANNADA

Imtixaanada qoraalka ah, gacan-ka-qabashada iyo laabka ee ardayda dhiganaysa tababarada isgaarsiinta guud iyo takhasuska qalabku waxay noqon doonaan saddex nooc.

1) Imtixaano kaltaneed ee maadooyinka kala geddisan lana qaado wakhtiyo habboon ilaa inta tababaradu socdaan.

2. Imtixaanno dhexe oo la qaado badhtamaha teeramka tababar takhasuseed walba.

3) Imtixaanno kama-dambays ah oo maadooyinka oo dhan ah lana qaado bisha ugu dambeysa ee tababarada takhasuska qalabka.

Dhammaan imtixaanadaas waxa samayn doona baraha u xilsaaran maadada ardayda lagu imtixaamayo.

Ardayda ka maqnaata imtixaan iyadoo aan wax cudur-daar ah haysan, waxay heli doonaan eber (Zero) imtixaankaas isaga ah. Eberkaas oo loogu dari doono marka la samaynaayo isku-celceliska imtixaanadiisa oo dhan. Ardayda ka maqnaado ka maqnaato imtixaan iyagoo haysta cudur-daar waxay heli doonaan isku-celceliska saddexdii imtixaan ee maadadaas ugu dambeeyey. Lambarkaas oo loogu dari doono marka la sameynayo isku-celceliska imtixaanadiisa oo dhan Cudur-daarada macquulka ah oo noqon kara jiro daran, uuna soo caddeeyay takhtar la aqoonsan yahay, ama fasax uu bixiyey Agaasimaha Machadka.

Ardayda dhigata tababarada xirfadeed ee gaagaaban (oo badanaaba ah dad shaqaale ah) waxay geli doonaan imtixaano la qaban doono wakhtiyo habboon inta tababarku socdo iyo imtixaan ugu dambays ah ee la qaban doono asbuuca ugu dambeeya ee tababarka.

QIIMAYNTA

Ardayda waxa lagu qiimayn doonaa natiijooyinkaimtixaankooda sida jaantuskan ku muujisan;

1) 75% iyo wixii ka sareeya ——— aad buu ugu qalmaa
2) 50% ilaa 74% ———— waa u qalmaa
3) 49% iyo wixii ka hooseeya ——— magudbe.

Tallaabooyinka laga qaadayo kuwa dhaca waxay ku tifatiranyihiin lifaaqydaa No 4 & 5.

QIIMAYNTA ARDAYDA

1) Tababarada IsgaarsiintaGuud

Tallaabo-qaadka arday walba waxaa la qiimayn doonaa ka dib marka la qaado imtixaanka dhexe iyo imtixaanka ugu dambaysta ah oo walba waxaana qiimayndoona «Guddiga Qiimaynta» Qiimayntaana waxa loo samayn doonaa sida jadwalka hoose ku qeexan.

a) Arday kasta waxaa loo xisaabinayaa natiijooyinkiisii kaltameed ee maada kasta ilaa iyo imtixaanka kama dambeysta ahaa.

b) Arday kasta waxaa loo xisaabinayaa natiijooyinka shaqada guriga ee maada kasta ilaa iyo imtixaanka kama-dambeysta ah.

c) Arday walba waxaa la isugu darayaa isku-celceliska natiijooyinkii imtixaanada kaltaneed iyo shaqada guriga oo «a» iyo «b». Sidaas darteed iskucelceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

d) Lambarka lagu helay «c» ayaa waxa lagu darayaa natiijada imtixaanka kama dambaysta ah ee maadadaas si loo helo shaqada iyo awood Waxbarashadeedka ardayga ee kolkaas.

e) Isku celcelis guud oo maadooyinka oo dhan ayaa waxa looga soo saari doonaa lambarada lagu soo xisaabiyay «d». Waxaana lagu magacaabi doonaa isku celceliska forma ee ardayga, waxaana lagu isticmaali doonaa liiska kala sarraynta ardayeed ee tababarkaas.

2) Tababarrada Takhasusuka Qalabka.

Horukaca iyo tallaabo-qaadka arday walba waxa la samayn doonaa ka bacdi imtixaan dhexeed walba iyo ka bacdi imtixaan

kama dambaysaad walba waxaana qiimayn doona «Guddiga Qiimaynta» Qiimayntaa waxa loo samayn doonaa sida jadwalkaan hoose ku qoran.

2.1 Ka bacdi imtixaan dhexeed walba.

a) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa isku celceliska natiijooyinka kaltan imtixaaneedkiisii oo dhan

b) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa isku celceliska natiijooyinka imtixaanadiisii guriga oo dhan.

c) Arday walba waxa la isugu darayaa isku celceliska natiijooyinka imtixaanadiisii kaltaneed iyo tan guriga ee «a» iyo «b». Sidaa darteed isku celceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

d) Lambarka lagu soo saaray «c» waxa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka dhexe si loo helo isku celceliska badhtamaha kal tababareedka oo loo arko shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga kolkaas. isku celcelisyadaas waxa lagu isticmaali doonaa samayn kala sarraynta guud tababarkaas.

2.2 Ka bacdi imtixaan kama dambaysaad walba.

a) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa dhammaan isku celceliska natiijooyinka imtixaanada kaltaneed laga soo bilaabo imtixaankii dhexe wixii ka dambeyey.

b) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa dhammaan isku celceliska natiijooyinka imtixaanada guriga laga soo bilaabo imtixaankii dhexe wixii ka dambayey.

c) Arday walba waxa la isugu darayaa isku celcelis natiijooyinka imtixaanada kaltaneed iyo kan guriga ee «a» iyo «b» Sidaa darteed iskucelceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

d) Lambarka lagu soo saaray «c» waxa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka kama dambaysta ah si loo helo shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga kolkaas.

e) Lambarka lagu soo saaray «d» ayaa waxa lagu dari doonaa isku celceliska badhtamaha kal tababareedka (para. 2.1. oo xubinta «d» ) si loo arko shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga intii tababarku socday. Taasna waxa lagu magacaabi natiijadii tababarka waxaana la isticmaali doonaa marka la samaynayo liiska kala sareeynta ee tababarka.

3. Tababarada Xirfadeedee

Tallaabo-qaadka arday walba waxaa la qiimayn doonaa ka bacdi marka la qaado imtixaanka kama-dambaysta ah waxaana qiimayn doona «Guddiga Qiimaynta». Qiimaynta waxaa loo samayn doonaa sidan ku qeexan jadwalka hoose, iyadoo natiijooyinka loo kala tixgelinayo qoraal iyo gacan-ka qabasho.

a) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa isku-celceliska natiijooyinka kaltan imtixaaneedkiisa oo dhan.

b) Arday walba waxa la isugu darayaa isku-celceliska natiijooyinka imtixaanadiisii kaltaneed iyo tan guriga ee «a» iyo «b». Sidaa darteed isku-celceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

c) Lamabarka lagu soo saaray «c» waxa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka dhexe si loo helo isku-celceliska badhtamaha kal tababareedka oo loo arko shaqada iyo awood waxbarashadeedka aradayga kalkaas, iskucelceliyadaas waxa lagu isticmaali doona samayn kala sarraynta guud tababarkaas.

2.2 Ka bacdi imtixaan kama-dambaysaad walba.

a) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa dhammaan isku celceliska natiijooyinka imtixaanada kaltaneed laga soo bilaabo imtixaankii dhexe wixii ka dambeyey.

b) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa dhammaan isku celceliska natiijooyinka imtixaanada guriga laga soo bilaabo imtixaankii dhexe wixii ka dambayey.

c) Arday walba waxa la isugu darayaa isku celcelis natiijooyinka imtixaanada kaltaneed iyo kan guriga ee «a» iyo «b» sidaa darteed isku celceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkooda.

d) Lambarka lagu soo saaray «c» waxa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka kama dambaysta ah si loo helo shaqada awood waxbarashadeedka ardayga kolkaas

e) Lambarka lagu soo saaray «d» ayaa waxa lagu dari doonaa isku celceliska badhtamaha kal tababareedka (para. 2.1. oo xubinta «d») si loo arko shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga intii tababarku socday. Taasna waxa lagu magacaabinatiijadii tababarka waxaana la isticmaali doonaa marka la samaynayo liiska kala sarraynta ee tababarka.

3. Tababarada Xirfadeedka

Tallaabo-qaadka ardáy walba waxaa la qiimayn doonaa ka bacdi marka la qaado imtixaanka kama-dambaysta ah waxaana qiimayn doona «Guddiga Qiimaynta». Qiimaynta waxaa loo samayn doonaa sidaan ku qeexan jadwalka hoose, iyadoo natiijooyinka loo kala tixgelinayo qoraal iyo gacan-kaqabasho.

a) Arday walba waxaa loo Xisaabin doonaa isku-celceliska natiijooyinka kaltan imtixaanadiisa oo dhan.

b) Arday walba waxaa loo Xisaabin doonaa iskucelceliska natiijooyinka imtixaanadiisa guriga oo dhan.

c) Arday walba waxaa la isugu darayaa iskucelceliska natiijooyinka imtixaanada kaltaneed iyo shaqada guriga ee «a» iyo «b» sidaa darteed iskucelceliska shaqada guriga waxaa lagu qiimeyn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

d) Lambarka lagu soo saaray «c» ayaa waxaa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka kama-dambeysta ah si loo helo shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga kalkaas isaga ha.

## LIFAAQA 5aad

## TALLAABO QAADKA ARDAYDA

### Ardayda Qaadanaysa Tababarka Isgaariinta Guud iyo Takhasuska Qalabka.

Iyagoo raacaya natii jooyinkii arday walba helay imtixaankii walba oo dhexe ama imtixaankii dambaysta ahaa, Guddiga qiimayntu markay ka baaraan degaan natiijooynka arday kasta, waxay warbixin u gudbin doonaan Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta taasoo ku saabsan sidii arday walba loogu meelayn lahaa fagaare shaqo oo ku habboon. Warbixintaas oo ka koobnaan doonta :-

a) U gudbinta formka xiga ardayda ku guulaysta formamka 1, 2, iyo 3.

b) U gudbinta tababarka Takhasuska qalabka ardayda ku guulaysata formka 4.

c) U gudbinta tababarka qalabka 6da bilood oo ugu dambaysa ardayda ku soo guulaysata 6da bilood oo hore ee tababarka takhasuska qalabka.

d) U gudbinta goobaha shaqada ardayda ku guulaysata tababarka takhasuska qalabka.

e) U gudbinta shuruudda leh ee formka xiga ama heer tababareedka xiga, iyadoo la siinayo digniin qoraal ah ardayda isku-celceliskoodu qarka uu u saaranyahay dhaciin.

f) Ku celinta ama reebidda ardayda formkii ama heer waxbarashadeedkii uu horay u dhiganayay ee ardayda ay guddigu ku qiimeeyaan inaanay wadi karin shaqada formka sare ee xiga ama heer waxbarashada xiga, laakiin ay rajada ka qabaan inuu gudbi doono haddii fursad la siiyo. Talo-geliyadaasi waa inay caadiyan ku ekaataa ardada formka 3 &4 ee isgaarsiinta guud iyo ardayda tababarka takhasuska qalabka qaata oo keliya.

g) Ka cayrinta Machadka ardayda awooddooda wabarasho aanay gayaysiin karin inay horukac tababareed sameeyaan. Iyagoo talo-bixinta ku daraya in ardayga la cayriyay loo qaato hawl-farsameed hoose haddii uu dabci wanaagsan yahay.

h) Dhiiri-gelin dhaqaale oo la siiyo ardayda heerkoodu gaarsiisanyahay siyaalaha ku lifaaqa No 7, oo ay shar-

di u tahay in dabooggiisa iyo imaatinkiisuba wanaag-yihiin.

2. Ardayda Qaadanaysa Tababarrada Xirfaddeed.

Tababar Xirfadeed kasta markuu dhammaado, Guddiga qiimayntu waxay lafaguri doontaa natiijooyinka arday walba is la markaasna waxay guddigu talo-bixinteeda u gudbin doontaa. Wasaaradda uu ardaygaasi ka yimid ama u shaqayn doono iyagoo u sii marinaya Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta iyagoo tixgelinaya awooda waxbarasho ee ardaygaas siday isla gaartaan inay tahay daw. Waxay guddigu talo-bixintooda ku dari doonaan:-

a) Awoodda ardayga shaqooyinkii tababarka uu ku qabtay iyadoo aan la kormeerin.

b) Awoodda ardayga uu shaqooyinkii tababarka uu ku qabtay iyadoo la kormeerayo.

c) Talo-bixin haddii ay natiijooyinkii ardaygu aad u hooseeyeen in loo diro hawlo aan aqoon farsameed sare u baahnayn.

3. Guddigu markuu talo bixintiisa samaynayo wuxuu tixgelin doonaa qodobada soo socda:

a) Waxbarasho dugsiyeedka guud iyo gacan-wax-ka-qabadka ardayga, iyadoo la fiirinayo natiijooyin tababaro hore haddii ay jiraan, isla markaasna si gaar ahaaneed loo tilmaamayo meelaha uu aad ugu fiican yahay iyo meelaha uu aad ugu xunyahay intaba.

b) Maqnaashihiisa, soo daahiddiisa iyo bugtadiisaba.

c) Dabeecaddiisa guud iyo faa'iidadiisa sarkaal ahaan.

d) Xaqiiqa ama sifo kasta oo jihayn karta shaqadiisa iyo awooddiisa ee lagu arkay intuu tababarka ku jiray.

4. TUSMO

Heerarka guud ee soo socda waa in tusaale ahaan loo qaataa marka arday walba la qiimaynayo. Waana in la xasuusnaada marka la qiimaynayo natiijooyinka ardayda formka I ilaa III inaan loo baahnayn in tirarkan loo raaco si adag, khaas ahaan marka arday helo natiijo qarka u saaran dhacniin. Markaas oo kale haddii guddigu isla garta in ardaygu ka gudbi karo formka xiga, waa inay ardayga fursad siiyaan. Markaasoo kalena waa in dignin qoraal ah la siiyaa sida ku tibaaxan LIFAAQA No. 6. Waana in arrimahaas oo kale loo arkaa kuwo gaar ah ee aan loo arag qaanuun lagaga hortegayo hoos-u-dhigga heerarka Machadka.

4. 1 Ardayda qaadata Tababarka Isgaarsiinta Guud.

| | |
|---|---|
| ARDAYDA FORMKA I | Isku-celcelis ah 50% ama ka kor ha u gudbo form II iskucelcelis ka hoo-seeya 50% halla cayrsho. |
| ARDAYDA FORMKA II | Isku celcelis ah 50% ama ka kor ha u gudbo form III. |
| | Isku-celcelis u dhaxeeya 45 ilaa 49 ha u gudbo form III, digniin qoranna halla siiyo. |
| ARDAYDA FORMKA III | Isku celcelis ah 50% ama ka kor ha u gudbo form IV, inta u dhexaysa 45 ilaa 49% ha u gudbo form IV. hana la siiyo qoraal dig. niin ah. |
| | Isku-celcelis u dhexeeya 40% ilaa 44°. ha ku noqdo formka (mar keliya) Isku-celcelis ka hooseeya 40% waa in laga cayriyaa Machadka. |
| ARDAYDA FORMKA IV | Isku-celcelis ah 50% iyo ka kor ha u gudbo tababarka Takhasuska qaqalabka. Isku-celceliska u dhexeeya 40% ilaa 49% ha u gudbo tababarka takhasuska qalabka, hadduu ku gudbo imtixaanka labaad (re-exam) hadduu ku dhaco form IV dib ha ugu noqdo. |

4. 2 Ardayda Qaadata Tababarka Takhasuska Qalabka.
isku-celcelis imtixaan dhexaad oo ah 50% ama ka kor ha u gudbo ugu dambeeya.

Isku-celcelis imtixaan dhexaad oo ka hooseeya 50% ha ku noqdo tababarka (mar uun).

Natiijo tababar oo ah 50% ama ka kor ha u gudbo goobaha shaqada.

Natiijo tababar oo ka hoosaysa 50% ha loo oggolaado inuu dib u qaato qaybtii ugu dambaysay ee tababarka fursadda ugu horaysa.

4. 3 Ardayda qaadata Tababarka Xirfadeed.
Ardayda waxa lagu kala qiimayn doonaa «aad buu ugu qalmaa» «waa u qalmaa» iyo «ma gudbe» sida uu qeexayo LI-

FAAYA No 3 waxaana guddigu tixgelin doonaa imaatinka iyo buugtaba.

4. 4 GUUDI AHAAN

Tusaalooyinka guud ee soo socda culayska waa in lasaaraa tallaaboqaadka ardayda xagga hawl farsameedka iyo gacan wax ka-qabashada marka loo eego maadooyinka aan farsamada ku lug lahayn oo tababarka ku jira.

Marka la fiirinayo imaatinka iyo wakhti dhowridda ardayda, gaar ahaan Tababarrada Isgaarsiinta guud, tusmooyinka soo socda waa in la isticmaalaa:-

a) Isku-celcelika ah maqnaasho 3 casho ama ka badan bishiiba waxa loo soo qaadi karaa eri.

b) Isku-celcelis ah daahid 4 casho ama ka badan bil uun waxa loo soo qaadi karaa eri.

c) Isku-celcelis ah bugto 4 casho ama ka badan bil uun waxa loo soo qaadi karaa eri iyo ku-noqosho tababarka marka ugu horaysa ee fursad la helo.

LIFAAQA NO 6

HAB-DHISKA DIGNIINEED

1) Dhammaan ma gudbayaasha (ka hooseeya 50%) isku celceliskooda fasaleed iskucelceliskooda tababar badhtameed iyo natiijoojinkooda tabarku waxa lala socodsiin doona ardayda ay arrintu khusayso iyadoo la isticmaalayo qoraal digniin ah. Digniinahaas waxa saxeexi doona qaybinna doona Agaasimaha Machadka.

2) Dhammaan digniinaha waxa qaybin doona Agaasimaha iyagoo laba koobi ah oo habka caamka ah ee Machadka NTTI/2, iyadoo uu koobi haysanayo ardayga arrintu khusayso koobiga kalena marka ardayga la gaarsiiyo ka bacdi lagu xafidayo galkiisa (PF/—),haddii uu ardaygu isla markiiba warqadda digniinta soo celin waayo, arrintaas waxaa loo qaadan doonaa gef sida ku sheegan LIFAAQA No. 8.

TIR. NTTI/PW/— HABKA CAAMKA AH EE DIGNIINTA

Ku; ————————————

Tababar; ——————————————— No. ———

Waxaa halkaan laguugu sheegayaa inaad ku dhacday tababarkan soo socda, adigo helay natiijo isku-celceliskeedu yahay —————— oo keliya

TABABARKA ISGAARSIINTA GUUD FORM I/II/III/IV
TABABARKA TAKHSASUSKA QALABKA ——— (naynaasta)

ISKU-CELCELISKA IMTIXAANKII DHEXE/ISKU-CEL-CELISKA TABABARKA

TABABARKA XIRFADEED ——————— (naynaasta)

SAXEEXA AGAASIMAHA———————

TAARIIKHDA ———————

Ku; — — — — — — — — — — — — — — — — — — — — —
(Agaasimaha)

Digniintaas sare waa arkay.

Saxeexa :———————
Taariikh ———————

F=G=:- Noqolka asalka ah waa inuu ardaygu la haystaa, la saxeexaa oo isla markiiba loo soo celiya meelaynta galka (PF/-) ardaygay khusayso.

(Habka NTTI/2)

## LIFAAQA NO 7

## GUNNO ARDAYDA

1. Gunno joogta ah, oo qadarkeeda marba dawladdu xadayn doonto, ayaa arday walba la siin doonaa. Ardaydaas oo ah ku-wa ku qaata tababarka Machadka Isgaarsiinta Guud. Waxay ardaydu gunnadaas u isticmaali doonaan kharashka gaadiidka, buugagta wax lagu qoro iyo buugagta farsamada di sy escbsts-dhsfoofs u ksbto, Gunnada waxa bixin doonaa Agaasimaha Mac-hadka ama ciddii uu xil saaro bil walba asbuuca hore ee bisha kale marka laga reebo ardayda cusub ee ku sheegan para No. 6

2. Bixinta gunnadu waxay ku xiran tahay shuruudaha soo socda:

a) Iska maqnaashaha maalin, ama maalin badheed, wa-xa laga goyn doonaa gunnadii maalintaas, iyadoo la tixraacayo xisadaha (goyntu waa 6/=

b) Imaatinka xisaaska Machadka wakhti dembe, ama habsaan fasax la'aaneed wakhtiyada shaqada lagu ji-ro, waxa la go/i doonaa 50%

c) Haddii arday jebiyo ama lumiyo shay ka mid ah alaab-ta dawladda Agaasimaha Machadku, hadduu doono waa ka joojin karaa gunnada ardaygaas ilaa qiimaha shaygii laga wada jaro ama qayb ahaan laga jaro.

d) Ardaygii ku yimaada dhar aan ahayn kan Machadka waxaa ka go'aysa gunno 4/

e) Agaasimaha Machadku wuu ka joojin karaa gunnada hadii arday sharciga Machadka ku xad gudbo, sida ku sheegan LIFAAQA No. 8.

3. Gunna waxa dib loo qiimayn doona ka bacdi markii imtixaan kama dambays ah la qabto taasoo ku isku-celiska fasaleed ee arday kasta. Qiimayntu waxay u dhici doontaa sidaan soo socota:

a) Isku-celcelis ah 70 ama ka kor ——— abaal gud laca. ceed.

4. Gunnadu isla markiiba way ka go'aysaa ka bacdi markuu Machadka ka baxo ama uu dhammaysto waxbarashadiisii.

5. Wax gunno ah ma laha ardayda hoos ku carrifani:-

a) Ardayda tababarka ku laabatay natiijo xumo aw. geed.

b) Haddii Guddigu farsamadu u garato in ardayga gunnadiisa la siiyo, waa la siin karaa.

6. Gunnada joogtada ah ardayda bilaabaysaa sannadka ugu horreeya ee tababarka isgaarsiinta guud waxaa saddexda bilood oo hore hayn doona Machadka. Waxaana gunnadaas loo isticmaali in lagu soo gado dharka ardayda wixii ka dambeeyana si caadi ah oo joogta ah bay gunadooda u heli doonaan.

7. Goynta gunada markuu habsamo ama maqnaado fasaxla'aan ama qef sharciga Machadka khilaafsan keensado ardaygu waxaa loo isticmaali doonaa lacagtaas iyada ah sidan hoos ku qoran:

a) Daweeynta dhaawacyada shaqaalaha Machadka ama ardayda ku gaara laababka, qalabka baraatikada IWM.

b) Qalabaynta iyo hagaajinta libraray ardaydu leedahay iyo iibin buugag waxbarashro

c) abaal gudyo la siiyo ardayda fiicfiican.

d) Hawlaha yar yar ee Machadka.

8. Tababarka Dugsiga Sare ee Xalane wuxuu raacsan yahay Machadka.

## LIFAAQA NO 8

## HABKA SHARCIGA MACHADKA

Si loo abuuro loona hantiyo hawo laaqi u ah Waxbarasho, waxaa muhiim ah in sharci hagaagsan lagu socodsiiyo Machadka. Ardayda waxqasta iy o kuwa aan u hoggaansanayn shar-

cigaba waa in laga raacdeeyaa Machadka wakhti horeba si aanay u sadhayn ardayda hoggaansan.

Agaasimaha Machadka ayaa u xilsaaran masuulna ka ah haynta iyo fulinta sharciga Machadka. Si uu u socodsiiyo wuxuu tixgelin docnaa Agaasimuhu go'aanada guddiga Xiriirinta iyo shirarka shaqaalaha Machadka. Agaasimuhu, hadduu doono, wuxuu gacan weydiisan karaa qofkii uu doono ee shaqaalaha Machadka, ka mid ah inuu wax kala qabto amba kala taliyo arrimaha sharciga, isiga keliya ayaase leh wixii go'aan kama dambaysa ah.

Marka arday ku xad gudbo sharciga Machadka, waa in si fiican looga taxadaraa loona baaraa si sharci loogu qaado. Qaadista sharcigana waa inuu ka horreeyaa qoraal, kaasoo dabadeed gelaya galka edebta. Haddii ay suuragal tahayna waa in caddayno laga qaadaa wixii markhaatiyaal ah oo goob joog ahaa markii gafku dhacay, Gafafku markay caddaadaan waa in loo saaraa:-

a) Gaf Daran: Tuugo, jejebin qalab dawladeed, khilaaf Sharciga Machadka, edeb-darro loola jeedo in lagu kala daadiyo horukaca ardayda kala ee Machadka, samayn waraaqo beenbeen ah, khiyaamayn imtixaan, maqnaasho badan, kaydsan agar gaf oo sahlan hawl waxbarasho sannadeed oo keliya.

b) Gaf Sahlan: Wixii gaf ah kana soo horjeeda sharciga Machadka isla markaasna aan lagu xisaabin karin gaf daran, waxaa lagu tirinayaa gafafka sahlan.

Wixii ciqaab ah ee lagu abaalmarin karo gararkaas kala duwan waxaa goyntooda iska leh Agaasimaha Machadka isagoo tixgelinayo culayska gafka. Jadwalka soo socda waa la isticmaalaa:

a) Gaf daran: eri aan soo laabasho lahayn, eri ku siman hal asbuuc, goyn gunno ama qaarkood muddo hal bil ah.

b) Gaf Sahlan: eri ku siman maalin, goyn gunno ama qaarkood muddo ah hal asbuuc, digniin qoraal ah.

Ardaygii ay ku caddaato inuu gaystay gaf ka mid ah kuwa ku sheegan jadwalka hore waxaa loogu sheegi doonaa gafkii sa qoraal, iyo ciqaabta uu mutaystay oo tifaftiran. koobiga gafka ah oo ardaygu arkay, waxaa lagu ridi doonaa galka ardayga arrintu khusayso.

## NIDAAMKA GUDDIGA

a) Nidaamka caamka ee guddiyeed ayaa xukuma ama ay ku dabbiqi doonaa ujeeddooyinkooda iyo shaqada guddi farsameedka xiriirinta.

1. Ajendaha shirka waxa sii diyaarin doona Guddoomiyaha shirka wuxuuna u gudbin doonaa xubnaha guddiga hal asbuuc ka hor intaan shirka la isugu imaan. xubnaha doonaya in ajendaha wax lagu daro wuxuu qoraal ahaan ku soo gaarsiinayaa guddoomiyaha toban casho ka hor intaan shirka la isugu imaan. Waxaa arrimaha looga hadli doonaa siday ajendaha ugu kala horreeyaan.
2. Shirarka khaaska ah mooyee, wuxuu guddigu marka hore ka wada xaajoon doonaa arrimihii iyo qodobadii shirarkii hore.
3. Arrimaha aan ajendaha ku jirin waxa laga hadli karaa oo keliya marka arrimaha ajenduhu dhammaadaan oo uu guddoomiyuhu yiraahdo, wax kale.
4. Shirarka khaaska ee guddiga waxa lagu soo qaadayaa oo keliya arrimaha keenay shirkaas aan caadiga ahayn, Foodna waa loo qaadi doonaa haddii ay lagama maarmaan noqoto.
5. Dood kasta xubin guddiga ka tirsani soo jeediyo waa inuu taageeraa qof kale oo guddiga xubin ka ah si looga hadlo dooddaas, doodda uu soo jeediyo guddoomiyuhu looma baahna in xubin kale taageerto.
6. Kabidda dood kasta ee xubin guddiyeed soo jeediyo waa in xubin kale oo guddiga ka tirsani taageertaa.
7. Wakhti habboon ayaa guddoomiyuhu siin doonaa falanqeynta doodaha iyo wixii kabid ahba.
8. Marka doodaha iyo kadibaha loo cod bixinayo, kabidaha ayaa marka hore loo cod bixin doonaa. Haddii ay jiraan wax ka badan hal kabid, kabidlii ugu dambaysey ayaa loo cod bixin doonaa.
9. Haddii kabid doodeed guddigu isku raaco, cod bixin looma samayn doono wixii kabid ah oo la keeno ama cod bixin doodii asalka ahayd.
10. Socodsiinta doodeed ama kabineed waxay ku xirmaan doontaa aqlabiyada gacmaha oo la taago xuhnaha guddiga oo dhammi. iyadoo lagu darayo guddoomiyaha, waxay xaq u leeyihiin inay cod bixin dhiibaan, cod bixintaas oo ama taageero ah ama ka soo horjeeda kabid ama dood, xubin kastaa waxay kaloo xaq u leedahay inay ka aamusto cod bixinta.
11. Haddii tirada taageerayaasha iyo kuwa ka soo horjeedaa kabid ama dood ay isla ekaadaan, guddoomiyaha Guggidu wuxuu xaq u leeyahay hal cod bixin oo kale inuu dhiibto haddii uu doono.

12. Natiijada bixinta codka waxa loo sheegi doonaa xubnaha guddiga marka codadka la tiriyi ka bacdi, iyadoo isla markiiba xoghaynta shirku ku darayso warbixinta qararaadka.

b) Guddi Farsameedka Qiimaynta:
Guddigani wuxuu mas'uul ka noqon doonaa:

1. Ilaalinta guud oo ay ku sameeyaan imtixaanada oo dhan ee Machadka, iyagoo fiiro gaar ahaaneed siinaya heerarka, waxyaallaha imtixaandaasu ka kooban yihiin iyo ujeeddada cad ee ay imtixaanadu leeyihiin.

2. Qiimaynta natiijooyinka imtixaanada kama-dambaysta ah oo dhan oo ku saabsan Tababarrada Isgaarsiinta guud ee asaasiga ah imtixaanada dhexe iyo kuwa kamadambaysta ah oo dhan ee tababarada Takhasuska Qalabka iyo imtixaanada kama-dambaysta ah tababarada xirfadeed ee gaagaaban ee waafaqsan ujeeddooyinka Lifaaqa No. 5.

Guddigu wuxuu ka koobnaan doonaa xubnaha soo socda:

1) Agaasimaha Machadka (Guddoomiye)
2) Ku-xigaha Agaasimaha Machadka
3) Madaxa Faraca Tababarka
4) Maareeyaha Mashruuca ee IYU
5) Bare Waaya arag ah ee ka tirsan ITU
6) Horjoogaha kooxda Iskaashiga Tababarrada ee GDR

Guddigu wuxuu kulmi doonaa ka bacdi markay dhammaadaan pp; a qaado, toxaanada dhexe iyo imtixaanada kamadambaysta ah, iyo mararkii kale oo Agaasimaha Machadku is yiraahdo waa Munaasib.

Shirarka Shaqaalaha Machadka:

Marka laga yimaado shirarka caadiga ah ee guddiyada Machadka,shir guud oo ay barayaasha Machadku ka soo wada qayb galaan ayaa la qaban doonaa asbuucii ama 14kii cishaba marba sida habboon iyadoo uu guddoominayo Agaasimaha Machadku shirarkaas waxa tixgelin doonaan socodsiinta hawlmaalmeedyada iyo habaynta Machadka iyagoo la kaashanaya tibaax. yaha ay guddiga xiriirinta farsameedku dejisay, warbixinta shirarka barayaasha waa la xafidi doonaa waxaa loo soo gudbin doonaa xubnaha shaqaalaha Machadka oo dhan koobi walba ee warbixineed waa in lagu ridaa galka shirarka ee Machadka. Horjoogayaashaa ardayda ee tababarada ka geddisan oo Machadka wax ka dhigta goobjoogayaal ahaan ayaa looga soo qayb gelin haddii loo baahdo.

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDU,

MARKUU Akhriyey arjiga taariikhdiisu tahay 14.8.78, ee uu soo qortay L/Xidigle MAXAMED CILMI FAARAX, kuna codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee **L.Y. 116453** Taariikh 12.8.78 Sh So. 41.000 (Afartan iyo Kow Kun) ee ku qoran magaciisa, lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga Ummada LaantaBoorame.

MARKUU Arkay taarka L. Y. 112, taariikh 16.1.1979 ee uu soo diray Laanta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka ee Boorame, kuna caddeeyey jiritaanka jeegaasi.

WUXUU Ogolaaday cusboonaysiinta jeeggu niay waajib tahay. isagoo tix-geliyey cadaynta qoraalka ah ee Bankiga Sameeyey Jeegga.

WUXUU Garawsaday in L/Xidiglaha loo cusboonaysiiyo jeegga isaga ah ka dhumay.

WAXAA LA AMRAYAA

In Bankiga ganacsiga iyo kaydka Boorame uu u cusboonaysiiyo Jaalle L/Xidigle Maxamad Cilmi Faarax jeegga lambarkiisa iyo lacagtiisuba kor ku sheegan yihiin, 15 (Toban iyo shan), maalmood ka dib markii qaraarkaan lagu soo saaro FAAFINTA RASMIGA ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horraysa mudadaa uusan cadayn iyo cabasho qoraal ah ka keenin ciddii haysta jeegga isaga ah:-

WAXAA LA FARAYAA

Codsadaha inuu deg deg u gaarsiiyo maqalka qaraarkaan Bangigii Sameeyey jeega kor ku sheegan, amase Bankii ugu dhow meesha isagu uu deggan yahay si Buugtaasi ugu dhejiyay maqaallada qaraarkaan irdohooda 15 maalmood, meelaha dadweynuhu ka eegan karo ee u furan.
Hargeysa 29. 1.1979

KAALIYAHA MAXKAMADDA
Jaalle Siciid Axmed Ismaaciil

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA
Jaalle Yuusuf Xaaji Cabdi

L. 151

## OGEEYSIIS ISU IMAATIN CAADI AH

SHINEEMA «HODAN» S. P. A. Saldhigeedu yahay Muqdisho, Ra'sumaalkeedu yahray Shs. 300.000/= waxa ogeeysiineysaa

Dadka qeybaha ku leh Shirkadda Shineema Hodan S.P.A. ee saldhigeedu yahay Muqdisho in ay ka soo qayb galaan shir Guudnimo ee Caadi ah laguna qabandoono saldhiga Shirkadda, maalinta bishu tahay 20 Maajo 1979 saacaddunatahay 9,00 subaxnimo, haddii suura gal noqonweydo shirku waxa mar labaad la qabandoonaa 15.6.79; isla saacadda kor ku xusan.

ARRIMAHA LAGA DOODI DOONO

1) Xogwaranka Guddiga Maamulka Guud iyo Baarayaasha

2) Hordhrigga Xaashida Miisaaniyadda iyo dheefta.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka ku qoran Buugga Shirkadda ilaa shan beri ka hor maalinta la isu imaanayo.

Muqdisho 28.2.1979

GUDDIGA MAAMULKA GUUD

L. 152

SOMALI BOTTLING COMPANY Ujeeddo: Digniin isku yeerid ah

Dhamaan waxaa loo yeerayaa Saamileyda Shirkadda Somali Bottling Company in ay iskugu yimaadaan Shirweyne caadi ah iyo mid aan caadi aheyn 15ka Luulyo 1979, saacaddu markey tahay 16ka P. M. (4ta Galabnimo), Xarunta Hargeysa.
Sida Qodobbada Xeerka Madaniga ah, waxa laga hadli doona arrimaha hoos ku qoran:

1) Dhinaca caadiga ah uruurinta Xisaabaadkii maalgelinta iyo dhismaha iyo oggolaanshaha Miisaaniyadda.
2) Dhinaca aan caadiga ahayn, siyaadinta maaliyadda, oggolaanshaha Saamiga Shirkadda in lagu daro dad cusub, ama la diido iyo habeyntii dadkii hore wixii aan si sharci ah ugu jirin Shirkadda sida Qodobka 2441 X.M
3) In la doorto Guddiga Maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka.
4) In laga hadlo wixii arrimo ah ee loo baahan yahay oo la xiriira kuwa kor ku xusan.

MAAMULKA SHIRKADDA EE KU M.

Muqdisho 10.6.1979

L. 152/BIS